

**Sharci lamb.19 ee 16 Agoosto1961**

**Qaab dhismeedka dowladda - Tirada xubnaha**

## **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la guddonsaday aqbalidda Golaha Barlamanka.

### **WUXUU SOO SAARAY**

#### **Qod. 1**

Dowladdu waxay ka koobnaan doonta:

- 1) Guddenka Golaha Wasiradaha;
- 2) Wasiirka Arrimaha Dibedda;
- 3) Wasiirka Arrimaha Gudaha;
- 4) Wasiirka Difaaca;
- 5) Wasiirka Caddaladda iyo Garsoorka;
- 6) Wasiirka Maaliyadda;
- 7) Wasiirka Caafimadka, Xoolaha iyo Shaqada;
- 8) Wasiirka Warshadaha & Ganacsiga;
- 9) Wasiirka Beeraha & Xaananada Xoolaha;
- 10) Wasiirka Waxbarasha Guud;
- 11) Wasiirka Dhismaha iyo Isgaarsinta;
- 12) Wasiirka Warfaafinta.

#### **Qod. 2**

Wax allaliyo wixii sharci oo ka soo horjeedo sharcigan waa la buriyey.

#### **Qod. 3**

Sharcigaan waa mid si deg deg ah loogu baahan yahay wuxuuna hirgeli doona sida ku cad faqradda 2 ee Dasturka 5 beri gudahooda maalinta u aqbaloo Barlaamanka Qaranka.

#### **Qod. 4**

Sharcigaani wuxuu hirgeli doonaa 15 Agoosto waxaana lagu soo daabici doona Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyada.

Sharcigaan waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ah ee shuruucda waxaana lagu soo daabici doona Faafinta Rasmiga ah.

Waxaa la faraaya cid kasto in ay u hoggansanato sharciga una hoggamiyo cid kasta.

Muqdisho, 16 Agoosto 1961.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha  
**Abdirashid Cali Shermark**